


# Guriga ma kuu taalaa daawo aadan u baahneyn?



## WAA MAXAY Take it to The Box (Gee Sanduuqa)?

Barnaamijka Take it to the Box waxaay dhiiri gelisaa isticmaalka amaanka, keydin amaan ah, iyo fogeyn amaan ah ee daawada aadan u baahneyn ee dhakhtarku qoro ama mid uusan dhakhtar qorin. Taas waxaa ka mid ah daawada dadka iyo tan xayawaanka.

Degmada Rice waxa ay ku dadaaleysaa ka hortagga khalad u isticmaalka daawada iyo dhiirigelinta in si haboon loo fogeyyo daawada aan loo baahneyn.

## Waa maxay SABABA ay muhim u tahay?

- Waa khatar isticmaalka khaldan ee daawada dhakhtarku qoray iyo tan uusan qorinba. Si amaan ah oo loo fogeyyo waxa ay ka dhigeysa mid aan si fudud lagu heli karin.
- Daawada oo aan si haboon loo fogeyn waxa ay keeni kartaa dhibaato soo gaarta degaanka. Si wanaagsan oo loo fogeyyo waxa ay caawisaa badbaadinta biyaha iyo ciidda.

## GOORMA ayaad heli kartaa?

Take it to the Box ee daawada lagu fogeyyo waa mid aad heli karto. **7 maalmoodee todobaadka, 24 saac ee maalin kasta.**

## XAGEE ayay ku yaalaan?

Sanduuqyo lagu fogeyyo ayaa la dhigay dhismaha gudaha:

- **Waaxda Booliska ee Northfield**  
1615 Riverview Drive, Northfield
- **Dhismaha Amaanka Dadweynaha Degmada Rice**  
(Rice County Public Safety Center): 50 E View Dr., Faribault
- **Waaxda Booliska ee Faribault** 25 4th St NW, Faribault
- **Waaxda Booliska ee Lonsdale** 115 SW Alabama St, Lonsdale

Liiska farmashiyayaasha degaanka ee laga helo sanduuqa lagu rido daawada, soo booqo: [ricecountycmhc.org/disposal](http://ricecountycmhc.org/disposal)

## Maxaa la iga doonayaa?

- Daawada magaceeda/nooca ay tahay waa inuu ku qoran yahay weelka lagu keenay
- Daawada ku keen weelkii asalka ahaa ee lagu keenay.
- Daawada ku rid sanduuqa dhinaca uu ka furan yahay.

